

Macluumaadka ku saabsan adeegyada iyo tagyeerada dadka naafada ah

Hordhaca Qiimaynta DDA:

Qiimaynta DDA waxa loogu talagalay inay shaaca ka qaado baahiyaha taageerada shakhsiga ee qof kasta kaasi oo la qiimeeyay.

Qiimaynta DDA waxa ay ka caawisaa qorshaha maareeyayaasha kiiska adeegyo iyo taageerooyin ee dadka naafada ah.

Maamulka gobolku waa inuu gaadhaa go'aan ku saabsan lacagaynta iyo khayraadka ee adeegyada dadka naafada ah. Marka lagu qiimeeyo dhammaan baahiyaha shakhsiga qalab qiimayn isku mid ah, Maamulka iyo go'aan sameeyayaal kale waxa ay u dhaw yihiin inay helaan macluumaad la isku halayn karo una muhiim ah habka go'aan samaynta.

Sidee ayay Qiimaynta DDA u caawisaa qofka leh naafada koboceed?

Qiimaynta DDA waxa ay qiyaastaa qof kasta tagyeerada shakhsiyadeed ee looga baahday si uu uga qayb qaato hawlo kala duwan. Intaa waxa dheer, waxa ay qiyaastaa taageerada qofka ee looga baahday meelaha hawlaha, shaqaalaysiinta, daryeelka caafimaad, iyo baahiyaha daryeelaha. Qiimaynta DDA waxa ay go'aan ka gaadhaa baraanijmayada iyo adeegyada uu shakhsigu xaq u leeyahay, iyo intee oo adeeg ayaa la oggolaan karaa si ay u helaan.

Kuma ayaa ka qayb qaata Qiimaynta DDA?

Maareeyaha kiisku waxa uu toos ula kulmaa qofka naafada ah iyo ugu yaraan qof kale kaasi si fiican u yaqaana loo adeegaha. Wakiilka sharciga ah had iyo jeer waxa lagu casuumaa inuu yimaado.

Intee ayay Qiimayntu qaadataa?

Waraysiga qiimayntu badanaa waxa uu qaataa 2 ilaa 4 saacadood waxa ayna ku xidhan tahay dhawr qodob. Tusaale ahaan, qiimaynta koowaad waxa ay qaadataa in kabadan marka loo eego ku dib u eegidda. Haddii shakhsigu sidoo kale uu u baahdo adeegyada Medicaid Personal Care (Daryeelka Shakhsiyadeed ee Medicaid), Qiimayntu waxa ay qaadan doontaa wakhti badan.

Badanaa sidee ayay u dhaci doontaa Qiimaynta DDA?

Dadka hela adeegyo lacag laga baxsho waxa ay heli doonaan qiimayn ugu yaraan sannad kasta. Haddii baahiyaha qofku ay is baddelaan inta lagu guda jiro sannadka, waxa laga yaabaa in loo baahdo dib u qiimayn.

Maxaa dhaca haddii qofku aanu doonayn in lagu sameeyo qiimayn?

Haddii qofku aanu doonayn Qiimaynta DDA uuna ku nool yahay bulshada dhexdeeda, way adag tahay in la ogaado taageerooyinka loo baahan yahay. Qofku waa uu diidi karaa qiimaynta laakiin DDA ma oggolaan karto adeegyada Qiimaynta DDA la'aanteed.

Maxay ka kooban tahay Qiimaynta DDA?

Waxa jira saddex qaybood, ama casharro, Qiimaynta DDA:

1. Casharka Taagyeerada Qiimaynta

Casharka Taagyeerada Qiimaynta waxa kujira Supports Intensity Scale (SIS) ee dhammaan loo adeegayaasha 16 jirka ah iyo kaweyn. SIS waa qalab qaran ahaan loo aqoonsaday waxana isticmaala gobolo badan si loogu qiyaaso qiimaynta ay u baahdaan dadka naafada ah. Booqo <https://siswebsite.org/> si aad u barato in badan oo ku saabsan SIS.

Carruurta da' ahaan ka hooseeya 16 jir, 20 su'aalood ayaa la isticmaalaa si loo qiyaaso baahiyaha taagyeeradooda.

Casharrada Qiimaynta Taagyeerada sidoo kale waxa kujira qiimaynta baahiyaha daryeelaha, arrimaha hawlaha kormeer ilaashan.

2. Casharka Qiimaynta Heerka Adeega

Casharka qiimaynta Heerka Adeega waxa loo isticmaalaa in lagu qiimeeyo taagyeerada kuwaasi oo looga baahdo hawlaha maalinlaha ah iyo daryeelka qofeed. Jawaabta su'aalahani waxa ay ka caawiyaan maareeyayaasha kiiska inay go'aan ka gaadhaan adeegyada daryeelka qofeed ee uu qofku heli doono.

3. Qorshaha Taagyeerada Shakhsiga

Qorshaha Taagyeerada Shakhsiga (ISP) waxa uu faah-faahiyaa taagyeerada kuwaasi oo meel la dhigi doono si caawintu ula kulanto baahida qofka. ISP waxa ay faah-faahisaa immisa adeeg oo laga baxsho ayuu shakhsigu xaq u leeyahay inuu helo, kuma ayaana siin doona adeega. Qorshuhu sidoo kale sidoo kale qeexi doonaa taageerooyinka uu qofku haysto kaasi uuna gobolku bixin. Qorshahan waala daabici doonaa waxana la siin doonaa loo adeegaha iyadoo la raacinayo qiimaynta iyo qorshaha kulanka.

Sidee ayay Qiimaynta DDA u go'aaminasaa adeegyada uu qofku xaq u leeyahay inuu helo?

Jawaabta su'aasha ee casharka Qiimaynta Taagyeerada iyo casharka Qiimaynta Heerka Adeega waxa ay abuuraan wax la yidhaahdo "acuity scores". Acuity scores waa qiyaasta xoojinta ee baahiyaha taagyeerada qofka lana bar-bardhigay shakhsi kale kaasi oo la qiimeeyay. Acuity scores ka shakhsiga ee qiimayntooda waxa uu ka caawiyaa go'aamida xaq u lahaanshaha barnaamijyada iyo adeegyada sida:

- *Daryeelka shakhsiyadeed*
- *Nasasho*
- *Adeegyada Guryaynta*
- *DDA Home & Adeegyada Ku salaysan Bulshada*
- *Adeegyada Shakhsiyadeed & Qoys ahaaneed*
- *Shaqaalaysiinta ama Baraamijyada La xidhiidha Bulshada*

Waa sidee haddii qof uuna oggolaan maxsuulka Qiimaynta DDA?

Haddii qof uuna oggolaan maxsuulka Qiimaynta DDA, racfaan ayaa la fayl garayn karaa. Maareeyaha kiisku waxa siin doonaa macluumaad qiimaynta la kulantay racfaanka ee xuquuqda waaxda go'aamada kuna salaysan Qiimaynta DDA.

Waa sidee haddii aan qabo su'aalo badan?

Wac Maareeyaha Kiiskaaga ama booqo websaytka Qiimaynta DDA: www.dshs.wa.gov/ddd/CAP.shtml